

Soo Koobidda Fullinta



Janaayo 2014

Seattle
Community
Police Commission

Magaaladena. Ammaankena. Boliiskena. Waxaa wanaagsan wadajirka.

Nala soo xariir:

**Office of the Community Police Commission
PO Box 94765
Seattle, WA 98124-7065
206-233-2664
OCPC@seattle.gov**

www.seattle.gov/policeCommission

Soo Koobidda Fullinta iyo Warbixinta Xariirinta Bulshada 2014 waxaa laga helaa internetka:

www.seattle.gov/policeCommission/resources.htm/.

Soo Koobidda Fullinta

Guddiga Boliiska Bulshada Seattle iyo Ka-qeybgelinta Bulshada

Sannadkii 2012, Magaalada Seattle waxay Heshiis la gashay Waaxda Caddaaladda Mareykanka (U.S. Department of Justice) (DOJ) in ay wax ka baddasho Waaxda Boliiska Seattle (SPD) kaddib marka DOJ soo sheegtay in ay jirto sasaan ama dhaqan ku saabsan in SPD jebiso dastuurka. Heshiiska Waanwaanta waxaa lagu gaaray in la abuuro Guddiga Boliiska Bulshada Seattle (Seattle Community Police Commission) (CPC), taasoo xubnaheeda mattalaan fikradaha balaaran ee bulshada loona xil saaray in ay bixiyaan fikradaha bulshada ka qabaan hawsha wax ka baddalidda waaxda boliiska iyo talooyinka la xariira wax ka baddalidda. CPC waxay mas'uul ka tahay ka qeybgelinta bulshadaha kala duwan ee Seattle si ay u fahmaan una mattalaan fikradahooda, iyo si cod iyo qeyb looga siiyo hagaajinta adeegyada boliiska.



Lisa Daugaard, Madax, Diane Narasaki, Madax, Claudia D'Allegri, Bill Hobson, Jay Hollingsworth, Kate Joncas, Joseph Kessler Tina Podlodowski, Marcel Purnell, Jennifer Shaw, Kevin Stuckey, Rev. Harriett Walden, Rev. Aaron Williams

Hawsha xariirka bulshada kowaad ee CPC waxaa la qabtay Oktoobar 2013. Ahamiyadda weyn ay leedahay dadaalka xagga bulshadaan waxay ahayd in ay hesho war celin ku saabsan talooyinka siyaasadda draaftiga CPC ee la xariira hawsha boliiska ka madax banaan eexda, joojinta, iyo xabsiga, isticmaalka xoogga, iyo duubista fiidiyowiyada gudaha baabuurta. War celintaan waxaa lagu daray warbixinta CPC iyo talooyinka ku saabsan siyaasadda la soo saaray Nofeembar 15, 2013. Xariirinta 2013, CPC waxay kaloo raadisay fikradaha bulshada ka qabto hawsha wax ka-baddalidda, guud ahaan, kaalinta CPC, waayo aragnimada lala leeyahay boliiska, iyo tilmaamaha la xaiira hawlaha ka-qeybgelinta bulshada mustaqbalka.

Heerka ka-qeybgalka bulshada waxay ahayd wax lala yaabo. Kuwa ka qeybqaatay waxay sheegeen in ay si baalaran uga heleen in la weydiyo in ay ka soo qeybgalaan iyo maslaxad sare si ay u helaan fursado mustaqbalka xagg wada hadalada socda. Hase ahaatee, cariiriga waqtiga hawsha ayaa keenay taxaddi badan iyo wuxuu ka hor istaagay qaar ka mid ah ururada iskaashiga ee muhiimka ah iyo xaafadaha ay ka soo jeedaan in ay si buuxdo uga qeybgalaan. Sidoo kale, waqtiga wuxuu ku biiriyay shakiga in war celinta bulshada ay si muuqato u saamayn karto siyaasada ugu dambeyso iyo isbaddalada SPD qaadato.

Ka-qeybgaleyaaasha waxay caddeeyeen in kalsoonida dadweynaha ka qabaan hawsha baddalaadda ay ugu dambeyn ku xernaan doonto caddeyn la taaban karo oo ku saabsan horumarka. Waxaa loo baahan yahay wada hadalada socda ee lala yeesho bulshada, waana in lagu soo daro warbixin ku saabsan horumarka la gaaray, kana mid ah ilaa inta siyaasadaha la qaatay ku soo daraan talooyinka CPC; macluumaad ku saabsan sida fikraddaha bulshada saamayn ugu yeeshen siyaasada ugu dambeyso iyo dadaalka baddalaadda guud

iyoo kaalmada farsamada shakhsiyad badan kana mid ah DOJ iyo. Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Mareykanka, Kooxda La Socodka Boliiska Seattle Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Magaalada Seattle, SPD (khaas ahaan kooxda u Hoggaansamida iyo Xisaabinta, shaqaalaha Siyaasadda iyo Fiirinta), Guddiga Tababarka Caddaaladda Dambiyada Gobolka Washington, Xafiiska Xisabiyaha Xisaabinta Aqoonyaanada, iyo Guddiga Xuquuqda Aadanaha Seattle. Waxaan rajeyneynaa in aan wada shaqeyno mustaqbalka inta aan sii wadno shaqadana.

Bishii Oktoobar 2013, CPC iyo iskaashatadeeda iyo taageerayaasheeda waxay isu keeneen in ka badan 3,400 xubnaha bulshada, iyo waxay qabteen in ka badan 150 shirar.

ahaan; xog la socota dhaqanka boliiska; iyo natiijadaha ka soo baxa wareysiyda lala yeesho bulshada sannad kasta.

Ka qeybgaleyaaasha waxay kaloo aaminsanayeen in dadweynaha xiiso u qabaan macluumaadka ku saabsan xuquuqdooda, sida loo gudbiyo ashtako, sida siistemaka la-xisaabtanka boliiska u shaqeyso, iyo habka baddalaadda.

CPC waxay sii wadi doontaa in ay raadiso fikradaha bulshada, iyadoo kafaalo qaado fursadaha wada hadalka ku saabsan siyaabaha loo hagaajiyo xariirka bulshada-boliiska, loona bixiyo fikradaha bushada ka qabto siyaasadaha qaar.

Sannadkii 2013, kooxaha ka shaqeyo siyaasadda CPC waxay ka faliideysteen wada shaqeynta

Creating change that will endure

What do we want to change?
The City of Seattle established the Community Police Commission (CPC) to provide community input on proposed Seattle Police Department (SPD) reforms. The CPC was established under a memorandum of understanding between the City and the U.S. Department of Justice (DOJ) which details work to be done over this period to ensure that the process and address the past use of excessive force.

Who is participating?
The CPC will engage members with a wide range of community and faith organizations, neighborhood and youth groups, and with key partner agencies to look about possible reforms. Many discussions will be sponsored by community partners engaged by the CPC to gather relevant input from communities particularly affected by police practices. Meaningful conversations with Seattle's diverse communities and institutional stakeholders are essential.

CPC and partners in reform

The CPC is supported by the Mayor and continued by the City Council. The CPC is supported by the Mayor and continued by the City Council. The CPC is supported by the Mayor and continued by the City Council.

CPC members:
Cecilia Chung, Lisa DeAngelis, Co-Chair; Bill Holman, Co-Chair; Kim Deane, Co-Chair; David Hernandez, Co-Chair; Thea Peterson, Co-Chair; Michael Brown, Co-Chair; Jennifer Davis, Co-Chair; Keith Shively, Co-Chair; Ray, Richard Baker, Co-Chair; Dan, Aaron Williams, Co-Chair.



OFFICE OF THE COMMUNITY POLICE COMMISSION

DICTIONARY DEFINING
PROPOSED REFORMS
GET INVOLVED
UPCOMING MEETINGS

Seattle Community Police Commission
Our City. Our safety. Our justice. Better together.

CREATING CHANGE THAT WILL ENDURE
The City of Seattle established the Community Police Commission (CPC) to provide community input on proposed Seattle Police Department (SPD) reforms. The CPC was established under a memorandum of understanding between the City and the U.S. Department of Justice (DOJ) which details work to be done over this period to ensure that the process and address the past use of excessive force.

The CPC plays a key role in the reform efforts. The CPC is charged with the responsibility of representing a broad range of community perspectives and to work out and engage communities directly to get critical feedback on the proposed reforms. The CPC will also be responsible for gathering relevant input from communities particularly affected by police practices. Meaningful conversations with Seattle's diverse communities and institutional stakeholders are essential.

The CPC is supported by the Mayor and continued by the City Council. The CPC is supported by the Mayor and continued by the City Council. The CPC is supported by the Mayor and continued by the City Council.

Seattle Community Police Commission
Our City. Our safety. Our justice. Better together.

Community Policing Questionnaire
Thank you for your interest in the proposed Seattle Police Department reforms and for your participation in the community policing questionnaire.

1. How would you describe your relationship with the Washington Metropolitan Police Department?

2. How would you describe your relationship with the Washington Metropolitan Police Department?

3. How would you describe your relationship with the Washington Metropolitan Police Department?

4. How would you describe your relationship with the Washington Metropolitan Police Department?

5. How would you describe your relationship with the Washington Metropolitan Police Department?

Seattle Community Police Commission
Our City. Our safety. Our justice. Better together.

Connecting our communities and the Seattle Police Department
The City of Seattle is committed to building a stronger relationship with the community and the Seattle Police Department (SPD). The City of Seattle is committed to building a stronger relationship with the community and the Seattle Police Department (SPD).

True public safety can only happen when the community and police work together.

CPC members:
Cecilia Chung, Lisa DeAngelis, Co-Chair; Bill Holman, Co-Chair; Kim Deane, Co-Chair; David Hernandez, Co-Chair; Thea Peterson, Co-Chair; Michael Brown, Co-Chair; Jennifer Davis, Co-Chair; Keith Shively, Co-Chair; Ray, Richard Baker, Co-Chair; Dan, Aaron Williams, Co-Chair.

Habka Xariirinta Bulshada 2013

CPC waxay raadisay aragtida dadweynaha guud, saraakiisha boliiska iyo wakiilada ururada, iyo kuwa kale ee maslaxadda ku qaba hawsha baddalaadda, hase ahaatee guddoomiyeyaasha waxay si gaar ah u daneyeen in ay ogaadaan fikradaha kuwa ku sugan Seattle oo horay dhibaato kala kulmay SPD, ama caado ahaan yar tahay wakiilada ay ku leeyahiin dajinta siyaasadda.

CPC waxay si gaar ah ugu dadaashay in ay martiqaado xubnaha ka tirsan bulshadaha wakiilada ku yar yahiin si loo soo saaro aragtida ay ka qabaan isbaddalada lagu sameeyo waaxda boliiska, lagunga qabto goobo ammaan ah, kaddib marka qandaraas lala galo 13 urur oo ku saleysan bulshada ee sida tooska ah ugu adeega dadyowga ay adag tahay in lala xariiro, iyo xariirka loo fidiyo in kale oo badan. Marka la soo qaado dhamaan, in ka badan 100 urur ayaa ka qeybgashay dadaalka xariirka.

CPC iyo kuwa ay iskaashadaan iyo taageereyaasheda waxay isu keeneen in ka badan 3,400 xubnaha bulshada iyo in ka badan 150 shirar. Waxaa la helay war celin, tiro ahaan iyo tayo ahaan - ka-qeybgaleyaasha waxay buuxiyeen in ka badan 3,000 su'aalaha wareysiga iyo fududeeyayaasha waxay si balaaran u qoreen fikradaha muhiimka ah ee la aqoonsaday inta uu socday shirka wada hadalada. In kastoo inta badan wareysiyada lagu buuxiyay Ingiriisi, waxaa la buuxiyay 464 wareysi oo lagu tarjumay luqado aan ahayn Ingiriisi.

Natiijadaha Wareysiga

Wareysiga waxaa loo sameeyay in lagu fududeeyo ka-qeybgal balaaran; looma sameynin ama looma maamulin siyaabo dhalin kara in staatiistiko ahaan loo mattalo fikradaha bulshada, dhamaan inta ku nool ama ka shaqeysa Seattle. Si loo hubiyo in leys barbar dhigi karo, su'aalo badan oo ku jira wareysiga CPC waxay ahayeen kuwa la mid ah wareysiga bulshada uu fulliyay Kormeeraha federaalka fiiriya kor ka fi Heshiiska Waanwaanta ku saabsan wax ka baddalidda Seattle. Wareysiga CPC wuxuu weydiiyaa su'aalo dheeraad ah, wuxuuna qabtaa macluumaad badan oo ku saabsan tirada dadka ka soo jawaabay. Wareysiga Kormeeraha, ee lagu qaaday Ingiriisi iyo telefoonka, waxaa laga helaa macluumaad waxtar leh iyo fikrad guud oo ku saabsan rayiga dadweynaha Seattle, idil ahaan. Hase ahaatee,

CPC waxay ku fakartay in ay muhiim tahay in la helo siyaabo kale oo lagu hubiyo sinaanta si ay u helaan dadka aan horay u lahayn cod, oo laga yaabo in ay arrimo la taaban karo ka haysato boliiska si loo helo sawir dhamaystiran oo ku saabsan dabeecadda bulshada. Sababtaas awgeed, wareysiyada CPC waxaa lagu bixiyay luqado badan, waxaa lagu qabtay shirar la fududeeyay gudaha bulshadaha la fogeeyay iyo waxaa martigeliyay hoggamiyeyaasha bulshada ee lagu kalsoon yahay. Si gaar ah ayaa looga taxadiray in fikrado laga helo dadka madaxa ka jiran iyo kuwa qaba itaal darri. Kormeeraha wuxuu waafaqay in natiijadaha ka soo baxa wareysiga CPC ahaan doonaan kuwo qiimo leh si ay u sameyaan heer aasaasi ah oo dhamaystiran kuna saabsan fikradaha bulshada ka qabto SPD.

Tirada dadka

CPC waxay ku guuleysatay himiladeeda ku saabsan gaarista dadyow badan oo aan qeyb mattasha jirin. Boqolkiiba todobaatan iyo labo (72%) wareysiga waxaa buuxiyay shakhsiyaad isu aqoonsaday in ay yahiin dadyowga midabka. (Guddiga wuxuu aqoonsan yahay in erayada "dadka midabeysan" leedahay macno duwan, waxaana halkaan loola jeedaa in lagu sifeeyo dadka, inkastoo ay si balaaran u kala duwan yahiin, aan isu aqoonsaneyn in ay yahiin Caucasiaon.) In ka badan 24% ayaa loo aqoonsaday in ay yahiin muhaajir ama qaxooti. Boqolkiiba toban iyo labo (12%) waxay ka yarayeen 18 sanno, 18% waxay u dhaxeyeen 18 iyo 25 sanno iyo boqolkiiba 23% waxay jireen 56 sanno ama ka weyn. Guud ahaan, kala qeybsanaanta ragga iyo dumarka waxay ahayd wax siman (49% ragga iyo 48% dumarka), iyo 1% waxaa loo aqoonsaday in ay yahiin dadka aan lagu tilmaami karin rag ama dumar. Ku dhawaad 16% ayaa loo aqoonsaday in ay yahiin "qaniis", "qaniisad" ama labo kacsi.

SOO KOOBIDDA FULLINTA

Sinaanta Dhaqanka

Dad badan (68%) ma aaminsana in SPD si siman ula dhaqanto dadka isiradooda kala duwan tahay iyo qowmiyadaha, iyo 65% ma aaminsana in SPD si siman ugu adeegto dhamaan xaafadaha Seattle. Marka loo qeybiyo saddax meel, labo meel waxay aaminsan yahii in boliiska Seattle aysan si wanaagsan ula dhaqmin gurilaaweyaasha ama dadka dambiyada gala sida dadka kale. In ka badan 50% waxay dareensan yahii in kuwa madaxa ka jiran ama dhibaato ku qaba qamrada, dhalin yarada, iyo dadka Muslimiinta ama ka soo jeeda Bariga Dhexe in aan loola dhaqmin si siman iyo in ka badan 40% ma aaminsana in bulshada LGBT loola dhaqamo sida wanaagsan ee loola dhaqmo dadka kale.

Guud ahaan, dadka soo jawaabay waxay aaminsan yahii in marar aad u badan, in boliiska ka qeybgalaan falal xun. Natijadaha ugu badan waxay ku saabsanayeen dadka oo loola dhaqmo si kala duwan taasoo ugu

wacan isirkooda - 73%, sifeynta isirka - 69%, iyo isticmaalka xoogga jirka xad dhaafka ah - 60%. Dhamaan dabeecadaha xun marka laga reebo labo ayaa keenay 50%.

Xariirka lala yeesho SPD iyo Habka La-Xisaabtanka

Marka loo qeybiyo saddax, ku dhawaad hall meel ayaa ashtako u soo jeediyay SPD, iyo boqolkii 57% kuwaasoo aan raali ka ahayn sida SPD wax u qabatay. Marka loo qeybiyo saddax meel, ku dhawaad labo meel (64%) waxay qof ahaan ula xariireen SPD ama waxaa la xariiray xubin ka tirsan qoyskooda, iyo boqolkiiba 60% ka tirsan kuwaan waxay sheegeen in xariirkaas uu xumaa. Su'aal dhamaadka ka furan oo la weydiyay kuwa waayo aragnimo u leh SPD in ay ka faalodaan, waxaa si buuxdo uga soo jawaabay 71%. Ku dhawaad bar ka bar (48%) faalada waxaa la siiyay kood bacdamaa ay ka hadleen xumaan. Inta badan faalada waxay soo jeedisay walwal ku saabsan boliiska oo jir ahaan ama af ahaan



Dadka tagay shirarka bulshada waxay aqoonsadeen waxa loo baahan in laga baddalo SPD, waxay siiyeen fikrado iyo xal, iyo waxay bixiyeen war celin ku saabsan draaftiga talooyinka siyaasadda CPC.

soo qaada weerar (14%), af xumo/sharaf darro (13%), iyo walwalka laga qabo takoorka boliiska (12%).

Siyaasadaha Lagu Hagaajiyo Shaqada SPD

Wareysiga waxaa ka mid ahaa su'aal ku saabsan siyaabaha loo hagaajiyo shaqada SPD. Dhowr ka mid ah arrimahaan waxay bixiyeen war celin gaar u ah xubnaha ku jira talooyinka siyaasadda draaftiga CPC. Dad badan, bolkiiba 75% ilaa 88%) waxay aaminsan yahiin in ay dhici karto in talaabadahaan ay samayn karaan, ama samayaan isbaddal.

Guud Ahaan Waxa Ka Soo Baxay

Inkastoo kuwa ka oo jawaabay wareysiga ay fikrado xun ka soo sheegeen boliiska, guud ahaan waxay weli siiyeen buundooyin sare bacdamaa ay ilaaliyaan ammaanka dadka, sameyaan shaqo wanaagsan iyaga oo u adeega xaafadhooda, iyo si xushmad leh ula dhaqmaan dadka. Marka la soo gaabiyo, inkastoo dadka ka soo jawaaba aaminsan yahiin in boliiska hawshooda bulshada oo idil si wanaagsan u qabsadaan, tiro badan dadka soo buuxiyay wareysiga waxay aaminsanyahiin in SPD ula dhaqanto dadka qaar si aan sineyn iyo in saraakiisha SPD ka qeybqaataan dabeecado badan oo xun.

Fikradaha Muhiimka ah ee laga soo Qaato Shirarka Bulshada

Dadka tagay shirarka bulshada waxay aqoonsadeen waxa loo baahan in laga baddalo SPD, waxay siiyeen fikrado iyo xal, iyo waxay

bixiyeen war celin ku saabsan draaftiga talooyinka siyaasadda CPC. Fikradaha ugu muhiimsan ee la soo qaaday inta ay socdeen shirarka waxay ahayeen kuwo waafaqsan natiijada wareysiga. Waxaa jirta kalsoon darro qoto dheer oo laga qabo SPD taasoo ugu wacan dadka waxa ay aaminsan yahiin iyo waxa ay kala kulmeen in saraakiisha qaar boliiska muujiyaan eex, xaq darrada dadka loo joojiyo, isticmaalka xoog aan loo baahneyn iyo iska ilaalinta baarista bacdamaa aan sida habboon loo sameynin duubista fiidiyowada gudaha baabuurta.

Eex

Kuwa tagay shirarka waxay aaminsan yahiin in boliiska muujiyeen eex marka ay si gaar ah u sifeyaan iyo marka laga waayo garasho iyo u dulqaadashada xagga hiddaha iyo caadada kale iyo dabeecadaha kale kana mid ah af xumada, sharaf darrada, cabsi gelin ta iyo guul guulka. Waxay aaminsan yahiin in boliiska aysan wax la qabanin qaar ka mid ah dhibaneyaasha dambiga iyo in xaafadaha qaar helaan adeeg yar - maxaa yeelay waa jiraa eexda shakhsiga ama dhaqanka hay'adaha taasoo dhalisa natiijado eex ku dhisan eex. Waxaa jira taageero xoog badan oo la siiyay shaqaaleynta saraakiil badan oo ka soo jeeda asal kala duwan iyo in waajib laga dhigo aqoonta hiddaha iyo tababaro kale (sida faragelinta qalalaasada) taasoo saraakiisha siisa xirfado lagama maarmaan ah si loogu adeego dad badan oo kala duwan. Waxaa kaloo jira taageero xooggan oo loo haayo siistemka la-xisaabtanka si loola socdo ashtakooyinka, aruurinta xogta iyo cabbirka guusha si loo yareeyo eexda SPD. Waxaa jiray taageero xooggan oo loo sameyay talooyinka siyaasadda CPC ee ku saabsan eex



la'aanta hawsha boliiska, dadka qaarna waxay soo jeediyeen in loo baahan yahay qeyb ka tirsan waxbarashada si xubnaha bulshada u ogadaan xuquuqdooda si ay u soo gudbiyaan ashtakooyinkooda eexda iyo sida hawsha baarista la xariirto u shaqeyso.

Joojinta iyo Xeridda

In badan ayaa aaminsan in dadka qaar si xaq darro ah loo joojiyo taasoo ugu wacan sifeynta isirka iyo sifeyn kale, cuqdad, aqoon la'aanta caadada, dambiyadii horay u dhacay ama asbaab kale oo aan sharci ahayn. Waxay aaminsan yahiin in ay dhici karto in saraakiisha aysan fahmin xuduudda awoodooda ku saabsan joojinta iyo xeridda, iyo xubno badan oo ka tirsan bulshada ma ogsoona xuquuqda ay leeyahiin marka ay ku sugan yahiin xaaladahaan. Waxay aaminsan yahiin in ay jirto baahi weyn in wax la baro dadweynaha iyo tababar la siiyo saraakiisha xagga xuquuqda ay leeyahiin iyo waajibaadka ka saaran arrimahaan, iyo in dadweynaha la siiyo qalab ay isticmaalaan marka la joojiyo Inkastoo ka-qeybgale yaal badan si wanaagsan u arkeen ujeedada talooyinka siyaasadda CPC - si loo caddeeyo sharciyada joojinta - waxaa jiray dad walwal ka muujiyay in talooyinka aysan si buuxdo uga hadlin dhibaataada. Sida hoos timaado siyaasadda hawsha boliiska ka madax banaan eexda ay CPC soo jeedisay, waxaa jiray taageero in qoraal laga sameeyo iyo in lala socdo joojinta si loo aqoonsado sasaanka dhaqanka aan miisaanka lahayn ee loo geysto kuwa boliiska joojiyaan.

Isticmaalka Xoogga

Waxaa jirta walwal la taaban karo in boliiska inta badan isticmaalaan xoog mar aan loo baahneyn, taasoo marmar ka sii darta xaaladdaha, kaddibna adeegsada jujuub ama xumaan. In badan ayaa soo qaaday waxyaabo ay shakhsi ahaan xogogaal u yahiin ama aqoonta loo leeyahay dhibaataada ka jirta gudaha bulshadooda. Inta badan, xalka wuxuu quseeyay saraakiisha tababarka sida ay u qaabili lahayeen dadka dhibka badan, sida loo qaboojiyo dhacdooyinka iyo si dadweynaha aqoon looga siiyo sharciyada ku saabsan isticmaalka xoogga iyo sida loo soo sheego dhacdooyinka. Waxaa kaloo la soo jeediyay xiiladaha la xariira shaqaaleynta iyo taageerada socota ee la siiyo saraakiisha. In badan ayaa ka faalooday in siyaasadda la soo jeediyay ee SPD tahay culeys iyo in ay kaalmeyn doonto saraakiisha iyo dadweynaha labadaba haddii la fududeeyo siyaasadda lana caddeeyo. Ka-qeybgaleyaasha waxay taageereen siyaasadda SPD ee la xariirta warbixinta iyo baarista dhacdooyinka loo adeegsado xoogga, inkastoo qaar aaminsan yahiin in la soo sheego xataa isticmaalka yar ee xoogga lana baaro. Ka-qeybgaleyaasha waxy soo jeediyeen talooyin dheeraad ah oo ku saabsan siyaasadda, kana mid ah in siyaasadda dajiso isticmaalka xoogga iyo qaboojiso heerarka la isticmaalo marka lagu sugan yahay xaaladaha ku lug leh u hoggaansami la'aanta madaniga.

Duubidda Fiidiyowga Gudaha Baabuurka

Xubnaha bulshada waxay soo jeediyeen shakki ku saabsan isticmaalka booliiska ka sameyaan duubitaanka fiidiyowga gudaha baabuurka. Dad badan ayaa jecleystay in la yareeyo ku lug yeelashada sarkaalka (in si toos ah loo adeegsado kaamerooyinka, iyo in yar ayaa taageertay in mar kasta ay shidnadaan kaamerooyinka. Waxaa lagu celceliyay baahida loo qabo waxbarasahda bulshada si loo hubiyo in dadweynaha fahamsan yahay hababka gacanta iyo hababka automaatikada oo lagu duubo, iyo xaqa ya u leeyahiin in ay raad ka reebaan falalka boliiska. In badan ayaa soo jeediyay taageerada ay u ahayaan siistemka la-xisaabtanka si loo hubiyo in loo hoggaansamo siyaasadaha duubista. In badan ayaa waxay kaloo taageereen talooyinka CPC iyo waxay aaminsan yahiiin in duubitaanka habaysan, leysku haleyn karo, ay maslaxad ugu jirto saraakiisha iyo dadweynaha labadaba. Qaar waxay soo jeediyeen in SPD fiiriso qiimaha kaamerooyinka jirka, khaas ahaan xagga saraakiisha aan isticmaalin baabuurta wareegta; iyo in kastoo la rabo in la helo duubista, in badan ayaa sheegay in ay ka walwalsan yahiiin xaqa loo leeyahay asturnaanta iyo sida ay la tahay in loo baahan yahay in boliiska wax ka qabtaan arrintaan adag.

Fikradaha Isbaddalka Mustaqbalka

Inkastoo ay jirta naqdi, ka-qeybgaleyaaasha waxay kaloo wadaageen aragti badan oo wanaagsan kuna saabsan SPD, waxayna soo jeediyeen hagaajin kala duwan. Qaar ka mid ah ka-qeybgaleyaaasha waxay sheegeen in ay isdhexgal wanaagsan, iyo xushmad kala kulmeen saraakiisha SPD. Dad kale ayaa waxay sheegeen in hal sarkaalka "xun" wasakhayn karo sharafta waaxda oo idil; qaarna waxay tilomaameen in dabeecadda liidato ee saraakiisha dagmooyinka kale in ay si xaq darro ah u wasakhayso sharafta saraakiisha SPD. Tiro dhalinyaro ayaa ka hadlay saraakiisha ay ku kalsoon yahiiin kuwasoo ay kala kulmeen wanaag - ficiladooda, saraakiishaan waxay tuseen xushmad iyo waxay muujiyeen in ay u hayaan daryeel, bixiyeen kaalmo, iyo garteen

taxaddiga ay ka hortagaan dhalin yaradaan. Fikrad muhiim ah oo marar badan la soo qaaday waxay ahayd baahida saraakiisha u qabaan in ay xariir la sameyaan bulshadaha kala duwan ee ku sugan Seattle. Waxaa jiray talooyin badan oo ku saabsan sida boliiska u bilaabi karaan xariir wanaagsan ay la yeeshaan bulshadaha ay u adeegaan. Xariirkaan wuxuu hagaajin karaa isgaarsiinta iyo xariirka, aysan si wanaagsan ugu adeegin qaar ka mid ah chanalada rasmiga ee maanta jira.

Xaaladda Iminka Jirta iyo Talaabadaha Xiga 2014

Warbixinta Ka-Qeybgelinta Bulshada

Warbixinta ku saabsan natiijada ka soo baxday hawlaha ka-qeybgelinta bulshada CPC sannadkii 2013 waxaa la siin doonaa dhinacyada ka qeybqaata Heshiiska Waanwaanta, iyo dadka kale ee aad u daneeya iyo mas'uuliyadda ka saaran tahay ammaanka dadweynaha iyo la-xisaabtanka boliiska Seattle, kana mid ah ururada iyo shakhsiyaadka ay CPC iskaashi la leedahay si ay u fulliso xariirka.

Fiirinta Siyaasadaha La Qaatay

Maxkamadda waxay horay u ogolaatay siyaasad cusub oo ku saabsan isticmaalka xoogga ee SPD iyo siyaasado kama dambeys ah oo ku saabsan hawsha boliiska ee ka madax banaan eexda, joojinta, iyo xeridda iyo duubiista fiidiyowga gudaha baabuurka waxaa la ogolaan doonaa lana hirgelin doonaa horaanta 2014. CPC waxay fiirin doontaa siyaasadaha la ogolaaday, waxay qiimeyn doontaa ilaa inta ay ku soo daraan qodobada muhiimka ah ay CPC ku talisay, kaddibna waxay bulshada u soo sheegi doonaan qodobada ku jira siyaasadaha ugu dambeeyo, sida kuwaan loo barbar dhigi karo talooyinka ay soo jeedisay CPC iyo habka dajinta siyaasadda ugu dambeeyo.

CPC waxay fiirin doontaa siyaasadaha la ogolaaday, waxay qiimeyn doontaa ilaa inta ay ku soo daraan qodobada muhiimka ah ay CPC ku talisay, kaddibna waxay bulshada u soo sheegi doonaan qodobada ku jira siyaasadaha ugu dambeeyo, sida kuwaan loo barbar dhigi karo talooyinka ay soo jeedisay CPC iyo habka dajinta siyaasadda ugu dambeeyo.

Fiirinta iyo Talooyinka ku saabsan Tababarka SPD ee ku Saabsan Siyaasadaha Muhiimka ah

Sannadkii 2014, CPC waxay talooyin ka bixin doontaa manhajka tababarka iyo mowduucyada la xariira tababarka ku saabsan dhowr maado kana mid a hawsha boliiska ka madax banaan eexda, joojinta iyo xabsiga, isticmaalka xoogga iyo faragelinta qalalaassha. Waqtiyada ugu dambeeyo ee la soo gudbiyo talooyinka CPC waa kala duwan yahiin, qaar waa in la gabogabeeyo saddaxda bil hore ee sannadka, qaarna saddaxda bil labaad.

Daraasadda Xogta iyo Talooyinka Ku Saabsan Sasaanka Falalka Hirgelinta

Sida waafaqsan siyaasadda cusub ee ka madax banaan eexda, SPD waxay iskaashi la samayn doontaa CPC si loo aqoonsado meelaha xoogga xad dhaafka ah loo geysto kooxaha qaar, isir ahaan, jinsi ahaan, ama asal ahaan, iyo meelaha qaar ee laga yaabo in dhaqamo la mid ah dhaliyaan natiijado aan xad dhaaf ahayn. Cilmi baareyaasha la shaqeeyo CPC waxay daraasad ku samayn doonaan xogta CPC xagga qabashada, joojinta, xeridda, jebinta sharciga, iyo isticmaalka xoogga, si loo taageero mashruucaas.

Fiirinta iyo Talooyinka ku saabsan la Xisaabtanka SPD

CPC waxay kaloo fiirin doontaa siistemka la-xisaabtanka SPD, kana mid ah siyaasadaha, dhismaha iyo hababka Xafiiska La Xisaabtanka Aqoonyaanada (Office of Professional Accountability) (OPA). Waxay fileysaa in ay

arrimahaan ka soo jeediso talooyin ugu dambeeyn Abriil 30.

Fiirinta iyo Talooyinka ku saabsan Xariirinta SPD

CPC waxay kaloo mas'uul ka tahay ka warbixinta dadaalka xariirka bulshada ee SPD, iyo waxaay dhici karto in ay soo jeediso xiilado ay waaxda adeegsan karto si ay u kordhiso kalsoonida dadweynaha. Jadwalka shaqadaan sannadka 2014 weli lama dajinin.

Xubnaha Kooxda Shaqada

Ka-Qeybgelinta Bulshada Kooxda Shaqada

Claudia D'Allegri iyo
Kate Joncas, *Madax*
Jay Hollingsworth
Diane Narasaki
Rev. Harriett Walden

Hawsha Boliiska Ka Madax Banaan Eexda Kooxda Shaqada

Jay Hollingsworth iyo
Rev. Harriett Walden,
Madax
Claudia D'Allegri
Lisa Daugaard
Marcel Purnell

Joojinta iyo Xeridda Kooxda Shaqada

Bill Hobson iyo
Jennifer Shaw, *Madax*
Lisa Daugaard
Kate Joncas
Joseph Kessler
Kevin Stuckey
Rev. Aaron Williams

Isticmaalka Xoogga

Kooxda Shaqada
Joseph Kessler iyo
Rev. Aaron Williams,
Madax
Jay Hollingsworth
Kate Joncas
Jennifer Shaw
Kevin Stuckey
Rev. Harriett Walden



